



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 14aad
Taariikhda: Nofeembar, 01/ 2026	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 12:09 PM	Saacadda uu Xirmay: 1:08 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi	Guntanka Kulanka: 28 Sanator
Martida Kulanka: 1. Wasiiru Dawlaha Wasaaradda Maaliyadda XJFS Marwo Raaxa Maxamuud Janaqoow. 2. Guddoomiyaha Hay'adda Maareynta Musiiibooyinka Qaranka, Mudane Maxamuud Macalin Cabdulle.	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka. 2. Ansixinta Ajandaha. 3. Akhrinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Hanaanka Lacag Bixinta Qaranka. 4. Dhagaysiga Warbixinta Hay'adda Maareynta Masiibooyinmka (SODMA) ee xaaladaha Abaaraaha dalka kajira.

Furitaanka Kulanka:

Senator Cabdixakiim Macallin Axmed Maalin ayaa akhriyey Aayadaha Qur'aanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 27 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska, Senator Ibraahim Aw-gaab Cismaan, si uu Golaha uga hor akhriyo warbixinta akhrinta seddixaad ee Hindise-sharciyeedka Hanaanka Lacag Bixinta Qaranka. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha ayaa cod geliyey Ansixinta ansixinta Hindise-sharciyeedka Hanaanka Lacag Bixinta Qaranka, waxay u dhacday sidan: **Oggol: 28 Senator** **Ka aamusay: Majirin** **Diidmo: Majirin**

Ansixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Guddoomiyaha Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Qaranka, Mudane Maxamuud Macalin Cabdulle, si uu Golaha Aqalka Sare warbixin faahfaahsan uga siiyo xaaladaha abaaraha ka jira dalka. Warbixinta kaddib, 6 Senator ayaa dood iyo su'aalo ka yeeshay warbixinta. Intaas kaddib, Guddoomiyaha Hay'adda ayaa ka jawaabay dhammaan su'aalihii ay Xubnaha Golaha Aqalka Sare ka weydiyeen xaaladaha abaaraha ee ka jira dalka.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajendayaasha kulanka.
2. Ansixinta Hindise-sharciyeedka Hanaanka Lacag Bixinta Qaranka.

Ugu dambayntii, Guddoomiye ku-Xigeenka Labaad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullahi Cali Xirsi (Xirsi) ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd **01:08 PM**.

DHAMAAD.